Heeso howleedyo

1. **Waa maxay hees hawleed?**
   - Waa heesaha latiriyo xilliga hawlah lagu foogan yahay
2. **Qor heesaha waraabka geela?**
   - Sidii sagal roob
   - Oo si san u da'ay
   - Waan sugaynee
   - Geelu sabadii
   - Ma isa soo simay
3. **Qor heesaha duduurta geela?**
   - Ma rakaad buu
   - Isasoo rogay
   - Ana rubadkaan
   - La rucleeyoo
   - Sool inaad mari
   - Sodon inaad qadi
   - Oo sidii noqon
   - Sidaa biyaha ku cab
4. **Qor heesaha caraabaha geela ?**
   - Caraabaha dheer
   - Caafimaadyo
   - Caano kugu gale
   - Geelu galabtii
   - Gaana iyo irmaan
   - Ma isla kala guray
5. **Qor heesaha daajinta geela ?**
   - Hadba laba geed
   - Kii hadh weynoo
   - Hadoodinal raac
6. **Qor heesaha waraabka lo'da ?**
   - Wanaagsane waris
   - Wayl uu xalay dhalay
   - Wiil la moodyoo
   - Loo wan qali gaadh
7. **Qor heesaha geediga lo'da ?**
   - Saddex gobonimo
   - Aanad garanayn
   - Garamooyee
   - Geelu kulama leh
   - Saanta gibishka ah
   - Ee guryaha taal
   - Geeska fidhinka ah
   - Ee gujada kulul
   - Gadhoodh iyo subag
   - Oo la galab lulo
   - Geelu kulama leh
8. **Qor heesaha waraabka riyaha?**
   - Kamiinka riyaha
   - Kabti farasiyo
   - Kayaad moodaa
9. **Qor heesaha geediga riyaha?**
   - Garooy maadaha
   - Waa maalin dhow
   - Oo midi dhashaa
   - Midi dhaqayo tahay
   - Midi dhaadhisaa
   - Laga dhiijiyaa
10. **Qor heesaha waraabka fardaha?**
    - Bakhayl adhi badan
    - Oo ban dhowyaal
    - Baruur mudashiyo
    - Adaa badhi ku leh
11. **Qor heesta dameeraha xiliga raro?**
    - Abeer dhago wayn
    - Arooryada hore
    - Waa axlaynjiray

12. Qor heesta dhaanka salsalka awrta?

- Qaalin waa sanqadhayaa
- Duq jidiinka ka reema
- Oo jiibiya la raartaa

13. Qor heesaha beero qodashada?

- Marka beertu bislaato
- Balkaan kuu gurayaayee
- Anaa kuu badhi gooyne
- Boorow beerta kuhay

14. Qor heesaha haanta caanaha?

- Haanyahay dhucdhuc dhabaryar
- Waagii dharaarowye
- Geelii dhabada qaadyee
- Waa la ina dhinayaayee
- Oday dhagarqabaa yimid
- Caanihii madhayaysay
- Mise waad dhanaanaysay

15. Qor heesaha beeyada?

- Nimaan maydi kuu guran
- Muxurkuna u dheerayn
- Masruuf makaaga adagyahay

16. Qor heesaha kabada?

- Geedba geedka udheer
- Laga garaacyeey
- Galool mudhay mulaaxdii

17. Qor heesaha hararka 'cawska'?

- Alla hoobey hoobaaligayeey
- Biskan quraankiiyey
- Naaqadka looxa lagu dhigayay
- Qaadirow raxmaankiiyo
- Hanaqadin qiyaamaha

18. Qor heesaha aloolka?

- Alla waa xujooy alla waa xujooy
- Geel xerada diidaa waa xujooy
- Alla waa xujooy alla waa xujooy
- Faras xakamaha diidaa waa xujooy
- Alla waa xujooy alla waa xujooy
- Naag xilaha diidaa waa ujooy

19. Qor heesaha jilaabashad kaluunka

- Tuuntuunsanow
- Tunba meel dhigow
- Tamadaw ku mee
- Mataraaqadbaa

Naxwaha af soomaaliga

1. waa maxay naxwe

- waa xeerka iyo qodomida ay luuqadu ku taagan tahay

2. sheeg shan qaybood oo ka mida qaybaha hadalka?

- magac
- magac uyaal
- sifo
- fal
- xidhiidhiyayaal

3. waa maxay magac guud?

- waa magac cidina gaar aanay ulahayn

4. qor kala duwanaashaha magac guud iyo magac gaara

- magac guud waa magac la wadaago sida "aray"
- magac gaara waa magac cid gaara leedahay sida "boorama"

5. **imisa qaybood ayaa loo qaybiyaa magacyada marka laga eegayo xaga taransiintiisa?**
   - cayn
   - Qodob
   - Wadar
6. **U kala saar magacyada qaar dahsoon iyo qaar muuqda?**
   - kuwa muuqda: Baar, cir, Beer, Ciid, Candhuuf
   - kuwa qarsoo: cod, Run, Caashaq, Ciil, Sharaf
7. **maxaa lagu gartaa magaca lab ee af soomaaliga?**
   - Qosobka muujinaya labka waxaa raaca "ka, kii, Kar"
8. **waa maxay magac la kabeedku?**
   - waa magacyada ka badan laba erey?
9. **Qeex magac jinsiyeed?**
   - Waa kuwa loo adeegsado tilmaamida labnimada ama dhadig nimada.

Bilaha iyo xiliyada

1. **qor bilaha guga?**
   - seermaweydo
   - cawl
   - dirir sagaalaad
2. **Qor bilaha xagaaga?**
   - samalaha
   - Bil karmeed
   - waran weer
3. **Qor bilaha dayrta?**
   - Dayr halalood
   - Dayr habis
   - Dabarsame
4. **Qor bilaha jiilaalka?**
   - Xays
   - Todob
   - Diraac
5. **Qor magacyada bilaha sanadka?**
   - Dago ama sako
   - Safar
   - bil mawliid
   - Rajab hore
   - Rajab danbe
   - sabuux
   - Waabariis
   - Soon
   - Soonfur
   - Sidataal
   - Carafo

Gogoldhiga suugaanta

- fanka waxaa bilaabay **(cabdi silimo)** waaanu ka bilaabay **Awdal** waxaanu bilaabay **1940** heestii ugu horaysayna waxa ay ahayd
  - **Balway hooy balwooy**
  - **Waxa I beleeyey mooyaaneey**
  - **Balway hooy balwooy**
  - **Waxa I beleeyey baabuure**

❖ **Balway hooy balwooy**

- Waxaana sii horumariyay kooxdii lagu magacaabijiray **Kaba cad,** oo ahaa shaqaalihii ingiriiska
- In hees lagu luuqeeyo waxaa bilaabay alle ha u naariistee **c/laahi qarshe** iyo **guroon jire**
- Riwaayadii ugu horaysay waa sameeyay alle ha u naariistee **Barkhad cad**, waxaana la odhan jiray ina sabool
- Riwaayadii labaadna waxaa curiyay x**useen aw faarax (dubbad)** waaana la odhan jiray **Isaseeg jacayl.**

Boqorka maansada (Gabay)

- Gabaygu waa bad kamida badaha maansada
- Gabaygu waxuu ka kooban yahay **laba dhudood** oo la yidhaahdo **Hooris iyo Hoojis**
- Gabaygu soomaalida **hooris**ka ayaa ka badan **hoojiska,** gabaygu wuu laba dhacaa, sadex dhacaa, afar dhacaa.
- Gabayga waxaa loo adeegsadaa 1. **Colaad hurinta** **2. Guubaabada** **3. hanjabaada**

Miisaanka maansada

- waa daahfurka balaadhan oo laggu sameeyay maansada soomaalida
- waa kasmo iyo aragti iyo aqoon ku dhisan oo uu si hufan ugu naqdiyey abwaankii waynaa ee maxamed xaashi dhamac (gaariye) October 1979

1. jiifto = 9

- sida geed caleenloo
- ubax guudka qariyoo
- oo gooni laamuhu

2. maroodi cadhoole=8

- hargaysi matoostay
- hogaanka ma diiday
- harqoodka matuurtay

3. Abtigaa ma fulaa = 8

- Ubaxeey Ubaxeey
- Indho yaab daranaa
- Kugu soo ururee
- Maxay kaa uriyeen

4. laago laago = 7

- Waa laan cuseyba
- ciiro fuushey
- Waa ciil dadwayne
- Cunug laga sameyay

5. shubaal = 7

- sool inaad tagi
- Sodon inaad qadi
- Oo sagaal dhixi
- Ood sidii noqon

6. haanta =10

- Nin saluugay muuqiisa
- Ama suufay maankiisa
- Ka salkacay xaqiiqdiisa
- Qabku saami ladha maaha

7. baar cade = 10

- kadaana naagbaa taqaan
- Udaa cidbaa taqaan
- Ka dooro adaa yaqaan
- Ta doora allaa yaqaan

8. Salsalka = 10

- Suleekhay aragaagu
- Nafta waa usamirsiisoo
- sadexbay ku qadaaye
- Ha kala goynin salaanta

Waydiimaha gabayada

1) Yaatiriyay macaan iyo qadhaadh?

- Amed diiriye qaasim

2) Soo koob dulucda guud e gabayga?

- Wuxuu abwaanku kafaaloonayay naftiisa isagoo adeegsanayay

3) kasoo saara afmaldaha ku jira?

- silan sugan

4) Yaatiriyay gabayga orod xoogso?

- Ismaaciil Mire Cilmi

5) sharax dulucda guud ee gabayga?

- wuxuu abwaanku waaninayay inankiiaa

6) Yaatiriyay heesta amba qaad?

- Siciid Saalax Axmed

7) Yaatiriyay gabayga macalimiinta iyo ardayda?

- Xaaji Aadan Axmed Af-qalooc **sanadkii 1975**

8) qor dulucda guud ee gabayga?

- wuxuu soo bandhigayaa qadarinta uu macalinku ka mudanyahay ardayga

9) qodobee abwaanku talada uu siiyey ardayga?

- Aqoonsada cilmiga
- dadaala
- ixtiraam yeesha

10) Yaatiriyay gabayga cilmigu waa iftiin?

- Axmed Colaad Digaale

11) Qor dulucda guud ee gabayga?

- inuu cilmigu yahay naas irmaan oon gudhayn

12) Yaatiriyay gabayga riyaha?

- Axmed Bare

13) sharax dulucda guud ee gabayga?

- wuxuu ku xeel dheeraaday amaanta riyaha iyo waxtarkooda

14) qor afmaldahanaha ku jira gabaygan?

- buun buunin iyo humaagayn

15) Yaatiriyay gabayga geela?

- Xasan Maxamed yusuf {x. tarabi}

16) Sharax dulucda ee gabayga?

- Dhiiga iyo dhaggarta sida uu u baajiyo

17) kumuu ahaa abwaankii tiriyay tuducyadan

- ● Baxsanaa aduunyadu muxuu barako dheeraaday
- xasan maxamuud yuusuf (xasan tarabi)

18) sharax kabixi dulucda meeriskan

- wuxuu amaanayaa geela

19) Qor sadex maahmaahood oo uu leeyagay geelu?

- Geelu laba jir soo wadamar
- Geelu waa geel wixii gooyaana waa geel
- Geela duqdiisu durduris aarankiisana maxaad u malayn

20) Yaatiriyay gabayga waano?

- C/laahi Guuleed Xeraad (dhuuxwayne)

21) sookob dulucda guud ee gabayga?

- wuxuu kadigayaa dhibaatada qabyaalada

22) Qor maahmaahyo ku saabsan qodobadan

- **midnimo**: qudhaanjo uruetay mulac way jiidaa
- **Qabyaalad**: dugsi ma leh qabyaaladi
- **Nabada**: inta nabadi jirtaa ninbaa laba nin leegyey
- **Colaada**: dagaal wiilbaa kudhinyee wiil kuma dhasho

23) Yaatiriyay gabayga gabaw iyo geeri?

- C/laahi Maxamed xirsi (salaan-carabay)

24) **falanqe dulucda guud ee gabayga**?

- dulucdu waa waano iyo tawbad keen

25) Qor tixo lagu tiri yay gabawga?

- lixdan laba iyo toban baan kor maray waana la hubaayee
- ma talaabadaan la cabsadoo tiigsi lugo mooday

26) Yaatiriyay gabayga tanaad?

- Maxamed Xaashi Dhamac gaariye

27) Yaatiriyay geeraarka casiisaw waa mahadaa?

- C/laahi suldaan timacade

28) Yaatiriyay gabayga fardaha ?

- Sayid Maxamed Cabdale Xasan

29) Yaatiriyay heesta balad-weyn?

- Maxamed ibraahim Warsame (hadraawi)

30) Yaatiriyay gabayga umulbaa ilawdee?

- Xuseen aw faarax

AF-Maldahane

- **Waa qaab farshaxanimo oo hadalka ujeedadiisa loo sogor daho**

- **Eekeeyuhu:** waa isbarbar dhiga laba humaag oo kala duwan balse wax iskaga mida 1. loo eeke 2. u eeke 3. dhinaca ay iskaga eeg yihiin 4. eereyada ay iskaga eegyihiiin

Tusaale

1. dadka sidii libaax dhiidhiyay wadar u laaya
2. sidii qalanjo dhaawacaan miyaan dhiraha u laynaayay

- **Shareere:** waa heerka ugu sareeya isku eek ay siinta, waa hadal ay weedhi hiisu ka kooban yihiin sadex qaybood 1. Loo eeke 2. U eeke 3. Dhinaca ay iska eeg yihiin

Tusaale

1. waa dhagax nafloo hayjadaa dhigay ilaahay waadhabarka seedaha kuyaal sidigta dhaameelee

- **Silan-sugan:** waa hadal maldahan oo ay ku wada jiraan ereyo ama weedho isburinaya

Tusaale

2. midigtay da iyo bidixdaydu waa laba mataanood midi waa martida soora iyo matadaadihis midakalena waamidiyo xiiraya iyo sun iyo waabay

- **Duurxul:** waa hadal maldahan oo ujeedo fogleh oo qoto dheerleh, waahadal cida loola jeedo aan sicad loogu cadayn waahadal weedh iyo ereyo ah la adeegsaday kafog macnaha ka muuq da

Tusaale

1. gacalkeed hawaydo haday geenyo kaa hebedo uhaayir waliba yaqaan hodadkay mirato uu wiilkii hana qaadaaba halabsadoo fuulo inaan heensaha saw hal garah maaha

- **Qofayn:** waa hadal ama tix ay suugaan yahanadu ku cabiraan dareenkooda iyaga oo waan aqli lahayn sida dadkoo kale ula hadlaa waraysanaaya, fariin u dhiibaaya

Tusale

- Fiidmaarta duushaay
- Fariintaydan qaadoo
- Ha furfurinn adon arag
- Farxadii jacaylkeen
- Ku calool fayoobaa

- **Xuska:** waa tix ama tiraab, lagu xusaayo qof dhintay intii uu noolaa wixii uuu ku wanaagsanaaa ama samayn jiray ,sidaa oo kale **xusku** waa iyadoo dib looga waramaayo wax la soo dhaafay ama wax hore u dhacay

Tusaale

- Habartay docdeediyo
- Degmaday ku noolayd
- Daruuruhu ku hooreeen
- Dadba wadda helmoodo
- Doog waraarac bay tidhi

- **Buun-buunin**: Waa hadal ama tix tiro ahaan iyo tayo ahaanba muujinaaya wax sidii uu ahaa si ka badan loo sheegay

tusaale

- marlay maqan tahay magaalda dhami
- mugdi weeyoo way madowdee

- **Quusin**: Waa hadal ama tix micnihiisu yahay lidkiisa

tusaale

- faadumo hillaac
- jaamac dayax

- Yamxeero: Waa hadal ama tix dhaliil ah. Waa tix ama hadal u badan calaacal

tusaale

- Ma talaabadaan la qadhqadhoo tiigsi lugo mooday

- **Astaan**: Waa hadal ama tix ku saabsan xornimadii ama gobonimadii soomaaliyeed

Tusaale

- Maantay curatoo mataano dhashee
- Magawdoo candhadii golaha merisee
- Aan maallo hasheena maandeeq